

Warbinta Ganacsiga ee Goobjoog News.

(Bisha Agoosto, 2015)

1.0 HORDHAC.

Tani waa warbixin bileedkii ganacsi ee Goobjoog FM oo aad bil kastaa uga barateen iney soo gudbiso, warbixintan ayaan diirada ku saarnaa dhaqdhaqaqa ganacsiga bil walba koror iyo hoos u dhac wixii ku yimaada, gaar ahaan sarifka lacagaha qalaad sida uu ahaa iyo isbedbedelka ku dhacay sarifka lacagaha ma daganayaasha ah loo yaqaano.

Waxaan had iyo jeer xog aruurintan xoogga ku saarnaa sarifka lacagaha madaganayaasha ee loogu isticmaalka badan yahay suuqyada aduunka gaar ahaan dalkeena, sida Doolarka, Bownka, Yuuraha, Dirhamka, Riyaalka Sacuudiga, Birta Itoobiya, Shillinka Kenya iyo Shillin Soomaaliga.

Si kastaba xog aruurinta sarifka lacagaha qalaad ee kor xusnay waxay daaha ka rogeysaa isbed-bedelka laga dareemayay lacagaha madaganayaasha ah marka la eego heerarkooda qabashada iyo bixinta.

Haddab, bishii tagtay ee August , diyaarinta warbixinta waxaa lagu saleeyay xogo laga soo uruuriyay suuqyada sarifka ee magaalada Muqdisho ku yaala, dabadeed xog aruurintaan soo bandhigideeda waxaa lagu muujiyay shax garaafeed kala tusmeeya tirada.


Sidey ugu fududaato qof walba fahamkeeda bisha tagtay isbedbedelka ku dhacay qiimaha sarifka lacagaha qalaad, taasoo aan si gaara ugu eegi doono qoraalka soo socda qiimaha lacag walba la sarifay iyo gaarkeeda Ama Jaantuskeeda.

1.1 Doolarka Maraykan iyo Lacagta shilinka soomaaliga:Sosh/\$(100).

Doolarka Maraykanka ayaa ah Lacagta loogu adeegsiga badan yahay guud ahaan gayiga Soomaaliya, inta badan Doolarkuna waa kan haga dhaqdhaqaqa ganacsiga Dalka, oo sidoo kalana waa kan jaan-gooya qiimaha lacag kastoo qalaad lagu sarifo suuqyada caasimada Muqdisho.

Haddaba, horaantii bishii August ee sanadkan Suuqayada lacagaha lagu sarifo ee magaalada Muqdisho \$100 waxa uu ku furmay qabashada gacanta hore 2,240,000 Sosh oo heerka qabashada ah iyadoo lagu bixinayay 2,250,000 Sh.So, Markii la soo gaaray Bartimihii basha ayuu sameeyay dhaqaaq iyadoo xiligaasi uu marayay heerka qabashada 2,275,000 Sh.Som iyo 2,285,000 Sh.So heerka bixinta.

Dabayaaqadii Bisha ayuu sameeyay hoos u dhac xoogan, ugu danbeyntii waxa ku soo xirmay 2,250,000 sh/Som oo gacan hore ah iyo 2,260,000 oo gacan danbe ah ah, sida ku cad jaantuska hoos ku xardhan.



1.2 Yuuraha iyo Doolar USA/EURO (100).


Lacagta Yuuraha waa lacagta ay ku mideysanyihiin in yar mooyee guud ahaan wadamada qaarada yurub dhaca, isla markaana waxay ka mid tahay lacagaha ugu qaalisan dunida qiimo ahaan.

Yuuraha hadana waxay ka mid tahay lacagaha lagu kala bedasho suuqyada Mugadisho inkastoo aanay saameyn xoogan u laheyn sida doolarka oo kale.

Hadii aan dib u qooraansado isbedbedelkii ku yimid lacagta Yuuraha bishii August,2015 waxaa ku yimid isbadal kooban .

Horaantii bishii Agoosto , waxuu €100 uu ahaa heerka qabashada \$104/ € 100 halka heerka bixinta uu ka ahaa \$105 / € 100.


8-11 bisha waxa uu marayay \$106/€100 heerka qabashada halka heerka bixinta uu ahaa \$107/€100. Bartamihii bisha waxa ku sugnaa xaalad sabeyn ah waxa markaasi u dhaxeeyay \$102 – 105 /€100, Hase yeeshi, Markii la yimid dhamaadkii bisha waxuu saldhigay \$104/€100 oo heerka qabashada ah , iyo \$105/€100 oo ah heerka bixinta. ah , Sida aad ka dhugan kartaan Jaantus 1.2 ee hoos ka muuqda .



1.3 Bownka iyo Doolarka \$/£ (100).


Lacagta bownka waa mid ka mid afarta lacagood ee igu saameynta badan suuqyada dunida islamarkaana qiimo ahaan ugu qaalisan , inkastoo laga leeyahay dalka Ingiriiska hadana waxay ka mid tahay lacagha qalaad ee lagu sarifo suuqyada magaalada Mugadisho .

Bishii 8' aad lacagta bownka ah waxa soo wajahay isbadal xoogan marka loo eego bishii ka horeysay, horaantii bisha £100 waxaa ka muuqanayay qiimo dhac, markaasina waxa uu marayay heerka qabashada \$139, halka heerka bixintana uu ahaa \$140 waxii markaa ka danbeeyay waxa jiray isbadal maalinle ah ee lacagtaasi soo foodsaaray , wuu soo xoogeystay isbadalkaas markii lasoo gaaray isbuucii bishaasi ugu danbeyay sida ku cad Jaantuska hoos ka muuqda.




1.4 BIRTA ITOOBIYA IYO DOOLARKA \$/ETB (100).

Birta itoobiya waa mid ka mid lacagaha ugu qadiimsan ee laga isticmaalo qaarada afrika , bishii Agoosto wuu koobnaa isbadalkii soo wajahay lacagtan . inaba wax isbadal ah oo lacagtaasi, horaantii bisha 100 bir waxaa lagu bedelayay \$3-\$4 , bartamihii bishana waxa uu marayay 3.5 ilaa \$ 4 oo heerkala qabasho iyo bixin ah, uga danbeyna waxa ku soo xirmay \$ 4 oo heerkala qabashada ah halka bixintiisana ay ahayd \$5 .



1.5 RIYAALKA SACUUDIGA IYO DOOLAR (USD/SAR).


Lacagta riyalka Sacuudiga waxay ka mid tahay lacagaha laga adeegsado dunida carabta gaar ahaana wadanka Sacuudi Carabiya islamarkaasna lagu sarifo suuqyada sarifka magaalada muqdisho. Si aad ka dheehanaysaan Sawirka hoos ka muuqda ma jirin wax isbadal oo soo wajahay lacagta 10 Maalmood ee bisha ugu horeeyay markaana waxa 100 Riyal \$ 25 halka heerka bixintuna u ahaa \$ 26,10 kii dhexe \$ 25.5 ayuu gacan hore uu haa, halka gacan danbana uu haa \$ 26, Uga danbeyntii waxa uu ku soo afjarmay 100 Riyal \$ 25.5 halka heerka bixintuna uu ahaa \$ 26 , sida ka muuqata shaxda hoose .



1.7 Dirham iyo Doolarka USD/UED(100).

Dirhamka oo ah mid ka mid ah lacagaha laga isticmaalo dalalka carabta gaar ahaan Imaaraatka carabta ayaa bishii tagtay ilaa iyo 26 kii bisha ma jirin wax isbadal ah sida aad ka daalacan kartaa Sawirka hoos ku xardhan .

Sarifka Lacagta \$/AED



AUGUST 2015

Jaantuska 1.7

